

## QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 1 ee 1 Jannaayo 1979 dib u samaynta

Baabuurta Dawladda

MADAXWEYNNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo 3aad ee Kacaan-kii 21. 10. 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee soo baxay 1dii Juulay, 1976;

ISAGOO OGAADAY: inay Hay'ado badan ee Dawladda marka gaadiidkoodu' jabo ama kharribmo ay ku hagaajiyaan hoosooyin ay leeyihiin dad gaar ahaaneed ayadoo ku baxdo lacag aad u fara badan;

ISAGOO TIXGELIYEEY: lagama maarmaannimada ah in shaqaalaha qabta hawsha dheeraadka ah ee dib u samaynta baabuurta loo aqoonsado qabaalgud dhiirri gelin ah;

ISAGOO TIXGELIYEEY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ee taariikhdiisu' ahayd 12. 9. 1979;

## WUXUU SOO SAARAYAA

*Sharciga soo socda :*

### QODOBKA 1AAD

Marka laga bilaabo 1. 1. 1979, waxaa si buuxda looga hirgeeliyey Hoosada Dhexe ee Xarunta Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka, hoosooyinka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka ee Gobollada iyo Degmooyinka hawlaha dib u samaynta baabuurta Wasaaradaha ee maamulka baabuurtooda u madax bannaan, kuwa Wakaaladaha, Shirkadaha Dawladdu dhinac ka tahay iyo Bankiyada, marka laga reebo Hay'adaha Dawladda ee iska leh hoosooyinka gaar ahaaneed.

### QODOBKA 2AAD

1. Waxaa dhammaan Gaadiidka ay iska leeyihiin Hay'adaha ku tilmaaman qodobka 1aad loo ogol yahay in ay ku' samaysataan hoosooyinka aan soo sheegnay oo keliya. Isla markaana waxaa sharcigan lagu xaaraantimeeyey in gaadiidka aan soo sheegnay lagu hagaajiyo hooso ay leedahay dad 'ama shirkad gaar ahaaneed.

Cirka, marka uu dhegeysto talada Farsama Yaqaanka Sare ee Wasaaradda (Injineerka), una sugnaato in gaadiidka qaarkood ee ku tilmaaman Qodobka 1aad ee sharcigan aan dib loogu samayn karin hoosooyinka gaadiidka, dhanka farsamada ama qalabka dayactirka awgeed, wuxuu amar ku' bixin karaa in dib loogu sameeyo hoosooyin gaar ahaaneed.

3. Sidoo kale, Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka dhulka iyo cirka, gobollada iyo degmooyinka wuxuu u wakiilan karaa Gudoomiyaha Guddiga maamulka gobolka ama degmada.

Guddoomiyaha Guddiga maamulka ee gobolka ama degmada waxaa awood loo siiyey amar bixinta ku tilmaaman xubinta 2aad ee qodobkan, ka dib marka uu dhegeysto talada Wakiilka Wasaaradda Gaadiidka dhulka iyo cirka ee jooga gobolka ama degmada.

#### Qod. 3aad

Hay'adaha ku tilmaaman Qod. 1aad marka loo sameynayo ama loo dayactirayo waxay la baxayaan kharashka alaabta, tan dayactirka la geliyey baabuurka iyo kharash hawl gacmeed ah oo saacadiiiba dhan Shs. 30/= (Soddon Shillin).

#### Qod. 4aad

1. Kharashka hawl gacmeedka (diritto di mano de'opera) waxay u kala baxaan laba qaybood oo kala ah:

- b. 10/= oo lagu shubayo khasnadda Dawladda iyo
- t. 20/= oo lagu dhiirri gelinaayo Shaqaalaha kala ah: Xir-fadlayaasha,

Farsama yaqaanada baabuurta ee Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka.

2. Shaqaalaha la siinayo lacagta dhiirri gelinta ah, waa in ay ahaadaan:

- b. Kuwo shaqadoodii caadiga ahayd si habsami ah u gutey
- t. Kuwo saacado dheeraadka ah shaqeeeyey iyo
- j. Kuwo tayada wax soo saarkoodu loo begey.

3. Shaqaalaha aan kor ku soo sheegnay waxaa abaalmarin-toodu loogu kala badin karaa hadba sida wax soo saarkoodu u kala badan yahay.
4. Shaqaalaha la siinayo dhiirri gelinta waa kuwa ku tilmaaman xubinta koowaad ee xarafka (t) ee qodobkan.

**QODOBKA 5AAD**

Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinaaya isbedelka ka dhashaascaarta suuqa wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro Xeer uu ku kordhinaayo lacagta hawl gacmeedka aan soo sheegnay.

**Qod. 6aad**

Hay'adaha Dawladda waxaa loo ogol yahay in gaadiidkoodu ay ku sameystaan hoosoooyinkooda.

**Qod. 7aad**

Waxaa hab xisaabeed laga furay Xarunta iyo Gobollada Curaar )Deposit accounts) dakhli kastana wuxuu gelayaas Curaartaas.

**Qod. 8aad**

Kharashyada Xarunta looga baahdo waxaa awood kharash si toos ah loo weydiisanayaa Xisaabiyaha Guud. Sidoo klena maamulayaasha Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka ee jooga gobollada iyo degmooyinka waxay weydiisanayaan Xisaabiyaha gobolka ama degmada.

**Qod. 9aad**

Awoodda ogolaanshaha qeybinta lacagta hawl gacmeedka la siinayo Shaqaalaha Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka ku xusan Qod. 4aad, waxaa la siiyey Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka. Gobolladuna wuxuu u Wakilan karaa Isuduwayaasha iyo Guiddiga Shaqaalaha ee Wasaa-

Qod. 10aad

Cod allaale ciddii ku xad gudubta arrimaha ku tilmaaman Qod. 2aad ee Sharcigan, waxaa lagu xukumayaa Xabsi gaara-ya ilaa laba sano ee xarig ah ama ganaax ilaa Shs. 10.000/= Toban kun Shillin) ama labada oo la isugu daro.

Qod. 11aad

Sharciga wuxuu dhaqan gelayaa 1. 1. 1979. Sharcigan wa-xaa lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 1 Jenaayo 1979

Madaxweynaha J.D. Soomaaliya  
(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre